Hagaha...qoridda sheekadaada gaaban ee koowaad

Qaar ka mid ah dadka wax qoro, ma oga waxa xiga ay qori doonaan: qofka sheekadooda ku jiro ayeey xaalad adag geliyaan ka dibna waxay eegaan wixii dhici doono. Taasi ma xuma, laakin markii aad bilaabeyso inaad qorto sheekoyin gaaban, waxaa fiican in lagu siiyo taloyin yar.

WAX WALBA WUXUU HALKAA U YAALA SABAB AWGEEDA

Xasuuso inuu sheeko gaaban, gaaban yahay. Ma qabtid waqti iyo meel dheer ee aad sheekada ku qorto, sidaas ageed wax walba ee aad ku qorto sheekadaan waa inuu muhiim ahaada. Ma jiro shil ku jira sheekada gaaban. Wax walba waa inuu socodsiiyaa sheekadaada, wax walbana wuxuu halkaa uu yaala sabab awgeeda: wada-hadal, tilmaam, qofka sheekada ku jiro, goobta. Waa inay isla wada shaqeeyaan si ay sheeko fiican u siiyaan qofka akhrisanaaya.

KANI MIYUU MUHIIM YAHAY?

Waa inaad mar walba xasuusataa sheekada aad rabtid inaad sheegto. Marmar waxaad dareemi kartaa inaad rabtid inaad qorto waxyaabo si toosan xiriir ula leheen sheekada! Tusaale ahaan ka dib markii uu bilaabay in uu sheeko ka qoro nin la dagaaley walaalkiisa, qofka sheekada qorey wuxuu bilaabi karaa inuu qoro sheeko ku saabsan walalkiisa oo ganacsi bilaabey.

Kani waa fiican yahay haddii uu laga-marmaan u yahay sheekada, laakin taasi waa su'aasha loo baahan yahay inaad is-weydiiso: kani miyuu muhiim yahay? Miyaan u baahanahay inaan ogaanno warar ku saabsan ganacsiga walaalkiisa? Xasuuso sheekada aad rabtid inaad sheegto.

SHEEKO GAABAN, WAQTI GAABAN

Ma ahan wax loo baahan yahay inaad raacdo, laakin haddii aad rabtid inaad qorto sheeko gaaban, waxaa fiican in sheekadaada ku saabsan yahay hal saac ama hal maalin, ama ugu badnaan hal toddobaad.

Tusaale sheeko gaaban ee fiican waa haweeney ee kor u fuuleyso jaranjarooyinka dhismaheeda, iyo dhibaato ku qabto. Markii ay dabaqa sare gaarto waxay garaneysa in sababta ay dhibaato ugu qabtey fuulidda jaranjarada uu ahaa inay uur leedahay. Markii ay jaranjarada hoos u soo degto waxay ka fikireysa in nolosheeda weligii sidii horey ahaan doonin. Taasi waa sheeko gaaban. Haddii uu ahaan lahaa wax si dhab ah u dhaco, wuxuu ku qaadan lahaa nus saac. Waxa fiican waa sida cad ee xaaladaas looga sheekeeyey; waqti gaaban ayaa qof noloshiisa si fiican looga hadley.

'WAQTIGA MUHIIMKA AH'

Qayb ka mid ah sheeko gaaban waa markii qofka sheekada ku jiro garto 'waqtiga muhiimka ah'. Tusaale ahaan sheekada haweeneyda jaranjarada fuushey, waxay garatey inay uur leedahay, waxayna og

tahay in nolosheeda uusan sidii horey ahaan doonin – waxaa ka lumi doono madax-bannaankeeda. Ma ahan inuu ahaado wax weyn ama xaalad weyn, waa inuu ahaada oo kaliya waqti uu wax walba cad u noqdo qofta sheekada ku jiro, waa inuu ahaada meesha uu sheekada doonaayey inuu tago.

SI TOOSAN U BILAAB

Markii aad qoreyso sheeko gaaban waqti uma qabtid dhisidda sheekada adigoo isticmaalaayo bogag badan iyo waqti uma qabtid inaad qorto taariikhda qofka ku jiro sheekada. Badanaa, sheekoyinka gaaban waxay ku bilowdaan wada-hadal, ama wax dhacaayo. Haddii ay sheekada ku saabsan tahay burcad bangiga jabsanaayo, sheekada waa inuu ku bilowdaa meesha lacagta lagu keydiyo oo la qarxinaayo. Ama waxaad isku dayi kartaa inaad sheekada ku bilowdo ereyoyin aad og tahay inaad si deg-deg ah ugu soo jiidan doonto qofta akhrisanaayo sheekada. Inkastoo uusan eheen sheeko gaaban buugga *A Christmas Carol* ee *Charles Dickens* qoray wuxuu qabaa bilow fiican ee ku soo jiidanaayo: ‘Marley oo dhintay, marka hore.’

WUXUU KU XIRAN YAHAY FAAH-FAAHINTA

Faah-faahin aad ayuu muhiim uga yahay sheeko gaaban, laakin waa inay faah-faahinta gaabnaataa, bakhayl iyo la dareemi karo. Waqti uma qabtid inaad tilmaamto qofta ku jiro sheekada, uma baahnid: waxaad xulan kartaa dhowr qaybo ee qofta ka mid ah, ama wax-qabad maad leh ay sameeyaan oo wax muhiim ah ka sheegaayo. Sheeko aan jecelahay wuxuu qofka ku jiro ku tilmaamaa inuu yahay tusaale ahaan qof kobo la’aan ah oo lugaha wasaq ka ah iyo maqaarkiisa adag yahay; ama sida uu jirriiqa u dhex-geliyo dhalo iyo u leeyahay ilko-caddeyn u eg warqad kala furmaayo. Faah-faahintaan wax gaar ah ee asaga ku saabsan ayuu sheegayaa: waxaa suurtogal ah inuu maskaxdiisa ilmo-ilmo yahay, inuu yahay qof wasaq ah iyo xishood leh, waxaa suurtogal ah inuu yahay qof cajiib ah.

HURDADA AYAAN KA KACEY, WUXUUNA AHAA RIYO...

Wax walba ha ahaado sida aad u geba-gabeyn doontid sheekadaada, wax walba ee aad go’aansatid inaad ku geba-gabeyso, ha ahaado sheeko ‘farxad ku dhammaaneyso’, mid wax yaab ah ku dhammaanaayo, ama ku geba-gabeynayso si uu qofka sheekadaada akhrisanaayo u rabo sheeko kale, waa inuu ahaada geba-gabo la garan karo.

WAXYAABO KALE EE AAD KA FIKIRI KARTID

Qofka sheekada qorey wuxuu qabaa xulashooyin badan si uu dareem uga dhex dhiso sheekada. Qaar ka mid ah waxay yihiin:

Ra’yiga

Yaa hadlaayo? Tusaale ‘Waan qosley’ ‘Way qososhey’ ‘Claire way qososhey’ ‘Ayaga wey qosleen’.

Inkastoo aad tahay qofka sheekada qoraayo, miyaad tilmaamtaa ra’yiga hal qof, ama laba qof? Xulasho walba wuxuu lahaan doonaa saamayn gaar ah. Haddii aad bixineysid hal ra’yi oo kaliya, qofka wax akhrinaaya wuxuu badanaa u beer-jileeci doonaa qofkaas ku jiro sheekadaada. Haddii aad isticmaashi ra’yi kala duwan waxaad lahaan doontaa saamayn miisaaman, laakin dareen ka yer.

Wada-hadal

Sheekadaada miyuu leeyahay wada-hadal? Miyuu u eg yahay mid isla markaas dhacaayo.
‘Kuma faraxsani xaaladdaan!’ ayeey ku qeylisey Claire ayadoo gacanta ku garaacayso albaabka qaboojiyaha.

Ama miyaad ka warbixin kartaa sida wax horey u dhacey?

Claire ma faraxsaneen waxayna diyaar u eheed inay baxdo.

Miyaan garan karnaa waxaa ay dadka sheekada ku jiro ku fikiraan?

Miyaan iska tegaa. Ma faraxsani.

Diyaarinta sheekada
Sidee ayuu diyaarinta sheekada ka ra'yi baxshaa dadka ku jiro sheekada iyo sheekadaada? Kani wuxu ahaan karaa wax walba sida goobta ay sheekada juquraafi ahaan ku matalan tahay iyo jawiga iyo alaabta taalo qolka qofta sheekadaada ku jira. Tusaale ahaan sheekada qofta jaranjarada gurigeeda fuuleyso, jaranjaroyiinka laftigooda ayaa ah socdaal nololeed, sababtoo ah markii ay dabaqa kore gaarto waxay ogaan doontaa wax cajiib ah. Mariinka iyo jaranjarooyinka waxaa lagu tilmaamey inay yihiin kuwo mugdi iyo cadaadis ah – waxaa suurtogal ah in taasi ay muujineyso dareenkeeda isku qasan inay cunug dhasho.

DHISMAHA SHEEKADA
Dadka bilow ku ah sheeko qoridda, dhismaha sheekada wuxuu u yahay seef laba af leh. Qaar ka mid ah dadka waxay sheegaan inay jecel yihiin sababtoo ah wuxuu siyaa maab ay ka shaqeeyaan markii ay sheekada qorayaan, kuwo kalena ma jecla in ay si rasmi ah u qorsheeyaan sheekada sababtoo ah wuxuu sheeko qoridda ka dhigaaya mid aan xiise lahayn! Waa fiican yahay in la xasuusto markii aad sheeko qoreyso ama iska daa: Adiga ayuu kugu xiran yahay.

Waxaa halkaan ku qorney dhismo sheeko ee ku muujinaayo habka qofka ku jiro sheekadaada loo gaarsiiyo wakhtiga muhiimka ah, ka dibna gaba-gabada sheekada halkaaso waxyaabaha lagu xalliyo. Kani wuxuu ku salaysan yahay fikradda in sheeko walba uu yahay socdaalka is-beddelka uu sameynaayo qofka ku jiro sheekada: iska hor imaadka wax ayuu ka garadsiinayaa, kaaso siinaayo awoodda ay is-beddel sameeyaan.

Tusaale ahaan: Qofka sheekada ku jiro ayaa ah nin dhallinyaro daneyste ah oo nasiibkiisa iska aaminsan.
Kani waxaa muujinaayo sheekada, sababtoo ah waxaa la qorey dhacdooyin muujinaayo in qofkaas ku maadayey dad kale ee joogo meesha lagu xannaaneeyo carruurta agoonta ah. Kani waa bilowga sheekadaada.

Xaaladahaan wuxuu xiriir la yeelan doonaan tuusalayn ka mid ah iska hor-imaadka ka dhici doono sheekada – iska hor-imaadka ugu weyn waa daneysnimada oo hor yimaado naxariista. Qaybtaan waa fal loo baahan yahay in la maro si loo gaaro qaybta ugu wayn ee wax ka dhici doono. Dhacdooyinkaan yar waxay xittaa awood siinayaan in sheekada la isku hor-yimaado - waxaa suurtogal ah in qofka sheekada ku jiro ogaadey in walaal uusan ogeen inuu lahaa uu degan yahay goobta lagu xannaaneeyo carruurta agoonta, wuxuuna ku khasban yahay inuu joojiyo daneysinimada iyo bilaabo inuu fahmo dadka kale. Wuxuu ogaanaaya inuu jecel yahay walaalkiisa iyo inuu noqon doono qof sidii hore ka fiican. Kani waa wakhtiga muhiimka ah. Sheekada wuxuu ku dhammaanayaa asaga iyo walaalkiisa oo guri isla degaayo. Waxaa loo baahan doonaa in dhacdooyin dhacaan ka hor intii gaba-gabadaan la gaarin – waxaa suurtogal ah in qofka sheekada ku jiro uu ku qal-qaalinaayo maamulayasha goobta lagu xannaaneeyo agoonta inuu xannaaneyn karo walalkiisa.

QAAB-DHISMEED AASAAS AH EE SHEEKO GAABAN

WAQTIGA MUHIIMKA AH
Marki ay sheekada is-beddeli doonto/
qofka sheekada ku jiro ayaa wax ogaan doono

ISKA HOR-IMAADKA
Iska hor-imaadka wayn ee sheekada

WAX-QABADKA
Dhacdooyinka waxay bilaabayaan inay keligooda xallismaan. Waxa loo baahan yahay inuu sameeyo qofka ku jiro sheekadaada si uu xaaladda u xalliyo

WAX-QABADKA
Waa markii dhacdooyinka sheekada dhib noqonaayaan
Waxa loo baahan yahay in la sameeyo si qofka ku jiro sheekadaada u galo xaalad iska hor-imaad

DHAMMAADKA
Wixii geba-gabada dhacey

SOO BANDHIGGA
Bilowga sheekada oo si fiican u bandhigaayo dadka ku jiro sheekadaada
Bilow soo jiidasho leh
Waxa lagu fahmi karo iska hor-imaadka ugu wayn ee sheekada ka dhici doono